



2020-09-08

Macluumaad loogu talagalay waalidiinta dugsiyada xannaanada iyo barbaarinta carruurta iyo dugsiyada ee Ludvika 200908.

Sannad dugsiyeedku wuxuu ku bilaabmay sida ugu fiican, halkaasoo maamulka, shaqaalaha, caruurta iyo waalidiintu, haa dhamaantood, masuuliyad iska saarayn, una adkaystaan isla markaana u wada shaqeeyaan si ku saleysan wadajir xaalada immika jirta ee cabuqa covid -19. Anagoo ka duulayna kor, waxaan rabnaa inaan iftiiminno in Hay'adda Caafimaadka Dadweynaha ee soo marta Karin Tegmark Wisell ay sheegtay "in carruurta iyo dhalinyartu ay ku faraxsan yihiin kaqeybgalka dugsiyada iyo waxqabadyada kale ee maalinlaha ah iyada oo taa laga duulayo, ayaa Hay'adda Caafimaadka Dadweynaha waxay soo saartay hage cusub oo loogu talagalay baaritaan ardayda ah laga bilaabo fasalka lix-jirka ilaa iyo fasalka sagaalad.

Tilmaamaha ayaa sheegaya in:

Carruurta dugsiyada barbaarinta waxaa lagula talinayaa inay ku noqdaan dugsiyada xannaanada markay si buuxda u caafimaad qabaan ugu yaraan laba maalmood, 48 saacadood. Haddii cunugga loo arko inuu caafimaad qabo laakiin weli qufac yar iyo diif yar ay tahay, waa inay ahaataa ugu yaraan 7 maalmood tan iyo markii ugu horreysay ee ilmuhu xanuunsaday iyo in ilmuhu dareemayo inuu caafimaad qabo 2 maalmood ka hor inta uusan ku noqon dugsiyada barbaarinta. Tijaabooyinka "Covid-19" laguma sameeyo carruurta dugsiyada xannaanada iyo barbaarinta.

Ardayda iskuulka waxaa lagula talinayaa in laga baaro iskuulka covid-19 haddii ardaygu muujiyo astaamo. Haddii ay natiijada baritaanku muujiso caabuqa, ardaygu waa inuu guriga joogaa ugu yaraan 7 maalmood tan iyo calaamadaha ugu horreeya iyo sidoo kale inuu dareemayo firfircooni iyo caafimaad qandho la'aan ah laba maalmood, 48 saacadood ka hor inta uusan ku noqon dugsiyada.

Haddii ay natiijadu noqon weydo caabuqa covid-19, ardaygu wuxuu ku laaban karaa dugsiyada isla marka uu dareemo firfircooni, caafimaad iyo qandho la'aan. Haddii ardaygu uusan samayn baritaan caabuqa covid-19, ardaygu wuxuu aadi karaa dugsiyada ka dib markuu si buuxda u caafimaad qabo laba maalmood, 48 saacadood. Haddii ardayga loo arko inuu caafimaad qabo laakiin weli qufac yar iyo diif yar jiro, waa inay ahaataa ugu yaraan 7 maalmood tan iyo markii uu ardaygu xanuunsaday iyo inuu ardaygu dareemay caafimaad 2 maalmood, 48 saacadood kahor kusoo noqoshada dugsiyada.

Kulamada waalidiinta iyo wadahalada horumarka

Dugsiyada barbaarinta iyo dugsiyada ma qaban doonaan wax kulan waalid ah inta lagu jiro xilli dayrta. Iskuulku wuxuu casuumayaa wadahalada horumarka ee ardayda oo dhan, laakiin hirgalku waxay u dhici doontaa qaabab kale iyo aalado isgaarsiineed.

Dugsiyada xannaanada wuxuu u diyaarinayaa wadahalada horumarineed dhammaan carruurta Unikumu ka. Wadahalada kadib waxaa lagu qaban doonaa iyadoo lagu saleynayo baahida carruurta, shaqaalaha iyo waalidka, sidaa darteed qaar baa wadahalada yeelan doona inta lagu jiro xilliga dayrta laakiin inta badan waxaa lagu casuumi doonaa wadahalada guga. Dugsiyada barbaarinta wuxuu kaloo ku bixin karaa wadahalada qaabab kale iyo qalab kale oo isgaarsiineed.

"Waa inaannaan is gacan qaadin laakiin waa inaan is gacan qabanaa"

Hälsningar

Jessica Carlberg
Verksamhetschef skola

Ulrika N Eriksson
Verksamhetschef förskola